

Xeerka Guurtida 1548: Wargalinada Diseembar 2022

Qeybta Biilka	Taariikhda dhameystirka	Hormarka Fulinta
<p>1. Waxay ku hagtaa ODDS inay samayso "wakaalad leh doorasho" si waafaqsa ikhtiyaar cusub oo loogu talagalay shakhsiyaadka doorta adeegyada guriga dhexdiisa.</p>	<p>Aan la cayimin</p>	<p>Markii hore, ODDS waxay ka shaqeysay si ay u buuxiso shuruudahan iyadoo u qaybisay wakaaladaha guriga dhexdooda ah laba nooc oo adeeg bixineed oo kala duwan: "wakaalad nooc caadi ah" oo aad u dhamaystiran iyo "wakaalad ah nooc shaqo-bixin" oo bixisa taageerooyin badan oo is-jihaynta.</p> <p>Iyada oo loo marayo jawaab celin ka timid la-hawlgalayaasha bulshada, ODDS waxay ogaatay in habkani aanu ku qancin doonin baahida "wakaalad leh doorasho" taasoo kicisay sharciga oo joojisay hirgelinta "wakaalladda moodeelka shaqo-bixiyaha." ODDS waxa ay si firfircoon u horumarinaysaa ikhtiyaarka beddelka ah ee adeegyada guriga oo qanciya ujeeddada biilka oo bixisa doorasho macno leh marka lagu daro "wakaalladda nooca caadiga ah" ee hadda la hirgeliyay.</p> <p>Maxaa xiga: ODDS waxay soo jeedin doontaa habab kale duwan oo lagu keenayo qaabka "wakaalad leh doorasho" Oregon oo ay ku casuunto jawaab celinta bulshada.</p>

<p>2. Waxay hagtaa ODDS inay xaqiijiso daah-furnaanta maaliyadeed iyo adeegyada tayada sare leh ee hay'adaha bixiyayaasha</p>	<p>Oktoobar 1, 2023</p>	<p>Qaybtan Xeerka Guurtida ee 1548 (SB 1548) waxa ku jira laba mawduuc oo wada-xiriira: daah-furnaanta maaliyadeed iyo tayada wakaalada bixiyaha.</p> <p>Daah-furnaanta maaliyadeed: ODDS waxay horey heshiis kula gashay Ururka Qaranka ee Agaasimayaasha Hormarinta Naafada (NASDDS) si ay u sameeyaan sahan ku saabsan adeega bixiyeyaasha naafada korriinka, Tusayaasha Muhiimka ah ee Qaranka (NCI). Sahankan waxa uu qabtaa macluumaadka la xidhiidha mushaharka iyo dheefaha. ODDS waxay rabta inay ku darto su'aalaha gaarka ah ee Oregon iyo shuruudaha SB1548 . Horaanta 2023, ODDS waxa ay ku martiqaadi doontaa la-hawlgalayaasha bulshada in ay wadaagaan fikrado dheeraad ah oo ku saabsan xog-ururinta, ka warbixinta, iyo hubinta in mushaharka iyo dheefaha la horumariyo iyada oo ay weheliso korodhka qiimaha taageerada tooska ah ee xirfadlayaasha. Jawaab celintan waxay ka muuqan doontaa xeerarka la soo jeediyay iyo hagida taageerada.</p> <p>Bixiyaha tayada wakaalada: ODDS waxay la kulantay iskaashatada bulshada wax ku saabsan mudnaantooda iyo fikradahooda ku aaddan wax ka qabashada welwelka u hoggaansanaanta, hagaajinta codsiyada bixiyaha bilowga ah, iyo xiriirka khidmadaha iyo ganaaxyada u hoggaansanaanta,</p>
---	-------------------------	---

		<p>sida lagu sharraxay biilka. Jawaab celintan waxaa lagu dari doonaa xeerarka la soo jeediyay.</p> <p>Maxaa xiga: ODDS waxay ku marti qaadi doontaa iskaashatada bulshada inay ka qaybgalaan guddiyada la-talinta xeerarka si ay u miisaamaan xeerarka la soo jeediyay. Sharciyadu waxay ahaan doonaan kuwo rasmi ah ugu dambayn Oktoobar1, 2023.</p>
<p>3. Si ku meel gaar ah waxay u laalaysa shuruudaha xeerka dhismaha ee nidaamka tuubada biyaha ee badi guryaha 24-saacadood iyo guryaha daryeelka korinta</p>	<p>Dhaqan galaysa</p>	<p>Transmittal PT-22-033 ayaa ku dhawaaqday hakinta. Way socotaa.</p>
<p>4. Waxay u baahan tahay waaxda iyo maamulka si ay u dhamaystiraan oo ay u soo gudbiyaan warbixin ku saabsan saamaynta shuruudaha rusheynta</p>	<p>Oktoobar 1, 2022</p>	<p>Xagaagii 2022, ODDS iyo APD waxa si wadajir ah u martigaliyeen kulan si ay ug wargaliyaan awarbixintan. Warbixintii waa la dhammaystiray oo waxaa loo gudbiyay Golaha Sharci-dejinta taariikhda la filayay. Ka akhriso halkan.</p>

deegaanka ee barnaamijyadeeda		
5. Waxay ku hagtaa APD inay dhamaystirto oo ay soo gudbiso warbixin ku saabsan adeegyada bulshada ku salaysan.	Oktoobar 1, 2022	ODDS lagama hadlaynin qeybtan.
6. Waxay ku hagtaa Waaxda inaad the soo gudbiyaan warbixin ku talinaysa in la casriyeeyo ruqsad bixiyaha iyo khidmadaha shahaadaynta iyo sidoo kale ciqaabaha madaniga ah.	Oktoobar 1, 2022	Xagaagii 2022, ODDS waxa ay laba kulan dhegaysi la yeelatay iskaashatada bulshada si ay u soo ururiyaan jawaab-celinta ciqaabaha madaniga ah iyo khidmadaha ruqsad bixinta oo ay u sameeyaan awarbixintan. Warbixintii waa la dhammaystiray oo waxaa loo gudbiyay Golaha Sharci-dejinta taariikhda la filayay. Ka akhriso halkan .